

Brashada la xiriirka: Waqtiga go'an ee Horumarka koritaanka Caadiga ah

Learning to Communicate: A Timeline for Typical Development — Somali version

Waalidka waa in uu fahmaa kuwan hoos ku qoran in ey yihiin hogaamin ah talaabooyinka horumarka xiriirka ilamhu maro markuu korayo. Ilmahu waa kala koriin duwan yihiin.

Ilmaha markey jirsadaan 3 bilood, inta badan waxey awoodaan:

- iney ciyaan, haddaaqaan, ooyaan si ey u xiriiraan. Waalidka iyo cidda daryeesha ilmaha waa fasiran karaan waxey dhawaaqaa ula jeedaan
- iney u dhug yeeshaan hadalka cidda xannaaneysa
- iney u dhug yeeshaan naaska hooyada ama dhalada caanaha

Ilmaha markey jirsadaan 6 bilood, inta badan waxey awoodaan:

- iney hantaatacaan
- iney ku jawaabaan qosol iyo af caddeyn
- iney eegaan halka dhawaaqa ka imaanayo

Ilmaha markey jirsadaan 9 bilood, inta badan waxey awoodaan:

- iney fahmaan kelmadda “maya” iyo dhowr kelmadood oo kale
- iney u dhug yeeshaan markey maqlaan magac ay garanayaan

Ilmaha markey jirsadaan 1 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney ku dhawaaqaan kelmado caadi ah (weysan kareyn mooyee)
- iney muujiyaan waxey u baahan yihiin ama doonayaan iyadoo tilmaamaan ama dhawaaq ah
- iney bilaabaan ciyaar sida markaad tiraahdo qofkaa meeye

Ilmaha markey jirsadaan 2 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney ku dhawaaqaan xarfaha aan shaqalada ahayn ama dhawaaqoodu sahlan yahay, waxey dhaadhaajiyaan kelmado badan

- iney inta badan ku hadlaan kelmado fasiix ah ee la fahmi karo
- iney fahmaan amarrada fudfudud
- iney indhaha ka eegaan qofka la hadlaya
- iney fahmaan illaa 300 kelmadood, waxeyna oran karaan 1 iyo labo kelmadood isku xiran
- iney si sax ah ugu jawaaban “haa” ama “maya”

Ilmaha markey jirsadaan 3 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney fahmaan amar labo tallaabood ah
- iney fahmaan illaa 900 kelmadood, waxeyna si fasiix ah u oran karaan illaa 200 kelmadood
- iney yiraahdaan hadallo gaab gaaban sida (ma sameynayo, ma doonayo) waxey isticmaalaan kelmado naxwe ah sida (ku, ka, u, la)
- iney isticmaalaan jumlado sahlan ee gaagaaban.
- iney weydiiyaan ama ka jawaabaan su'aala sahlan
- iney isticmaalaan hadallo naxwahoodu yahay waqti la soo dhaafay iyo waqti soo socda

Ilmaha markey jirsadaan 4 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney fahmaan amar sadex talaabod ka kooban
- iney fahmaan illaa 2,000 oo kelmadood
- iney isticmaalaan jumlado ka kooban afar illaa lix kelmadood
- iney isticmaalaan kelmado magac u yaal ah sida (adiga, asaga, aniga)
- iney sheekeeyaan, lakiin isku daraan runta iyo waxa khayaaliga ah

Ilmaha markey jirsadaan 5 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney fahmaan illaa 2,800 kelmadood iyo iney ku hadlaan illaa 2,000 oo kelmadood

- iney isticmaalaan jumlado adag
- iney sheeko dheer oo run ah sheegaan
- inney isticmaalaan xarfaha aan shaqallada aheyn